

NDIS-ka Taageerada Caafimaadka Maskaxda ee La helo NDIS



Qaab caawimada lagu heli karo dalabyada NDIS-ka

Mashruuca Caymiska Naafada Qaranka (National Disability Insurance Scheme - NDIS) wuxuu caawimaa dadka naafada ah, kuwaas oo ay ku jiraan dadka la nool xanuunada aadka u daran ee dhimirka. NDIS-ku wuxuu caawimaa hawl maalmeedka sidoo kalena waxay isku xirtaa bulshooyinka.

Taageerada Caafimaadka Maskaxda ee Laga Helo NDIS waxay dadka qaangaarka/waaweyn ee la nool naafonimo dhanka maskaxda ah ka caawintaa sidii ay NDIS ta u sahmin lahaayeen. Waxaanu la shaqayn doonaa adiga, qoyskaaga, daryeellayaasha iyo adeegyada caafimaadka si ay wax kasta idinkugu kala cadaadaan, howludhuna idinkugu fududaadaan si isla markaasna aad si sahlan wax kasta u maareysaan.

Taageeradeena waxaa ka mid ah

- sidii loo soo ururin lahaa cadeymaha ku taageeraya iyo dukumiintiyada aqoonsiga si markaas loo codsado helitaanka NDIS-ta
- Si aan idiin kala xiriirno adeegyada caafimaadka, kuwaas oo ay ku jiraan kuwa dhakhtarka guud (GPs) iyo dhakhtarka kuu gaarka ah ee caafimaadka maskaxda (ayadoo adiga fasax lagaa heysto)
- inaad hesho meel aad la soo xiriiri karto haddii aad qabto su'aalo la xiriira NDIS-ta
- Ururo isuna keen caddayn siyaada ah wixii cadeymo dheeraad ah haddii ay NDIS-tu u baahdaan si ay taasi uga caawiso inay waqti munaasab ah go'aan uga gaaraan
- in lagaa taageero sidii aad uga qaybgali lahayd shirarka isku xiraya bulshada iyada oo loo marayo adeegyada Iskuduwaha Deegaankaaga (Local Area Coordinator - LAC) (qaab taleefan ama fiidiyoow ah)
- in hadana dib loola xiriirno NDIS-ta ama Iskuduwaha Deegaankaaga (LACs) ayadoona wax laga weydiinayo halka ay marayaan howlihii la xiriiray arjigaaga

- sii hagitaan ku saabsan sidii aad uga codsan lahayd dib u eegis lagu sameeyo sidoo kalena taageer xiriirinta sidii laguugu xiri lahaa adeegyada khaaska ah si markaas aad racfaan uga qaadata go'aan ay NDIS-tu gaartay
- in dadka la nool naafo dhanka maskaxda ah in lagaa caawiyo iyo sidii mar kale loo qiimeyn lahaa inay u qalmaan NDIS-ta.

Shuruudaha u-qalmitaanku

- waa u qalmida qaangaar ka yar 65 sano
- waa in qofku la nool yahay xaalad aad u daran oo caafimaadka oo maskaxda ah
- waa in qofkaas muddo 2 sano ka hor lagu sheegay inuu qabo xaalad caafimaadka oo dhimirka ah
- waa in codsigaaga uu hoos imaanayo naafanimao dhanka maskaxda ah
- waa inaad leedahay dhakhtar guud (GP) ama dhakhtarka dhimirka si uu u taageero arjigaaga/codsigaaga.

Fadlan ogsoonow

Dadka hadda kiiskooda ay gacanta ku hayso Hay'ada Caafimaadka Dhimirka ee deegaanka xaq uma laha, muddo bil gudaheed ah in adeegaas laga saarayo mooyee.

Helitaanka adeegga



MID KASTA

T 1300 003 224
E NDISAccess@each.com.au

Deegaanada Dawlada Hoose (Local Government Areas - LGAs)

Boroondara, Manningham, Monash, Whitehorse, Knox, Maroondah, Shire of Yarra Ranges, Greater Dandenong, Cardinia, Casey, Banyule, Darebin, Whittlesea and Nillumbik

ACSO

T 1300 022 760
E NDISAccess@acso.org.au

Deegaanada Dawlada Hoose (Local Government Areas - LGAs)

Dhamaan deegaanada dawlada hoose (LGA) ee tuulooyinka iyo dhulka miyiga ah ee gobolka Victoria oo dhan

Neami National

T 1300 379 462
E intake@neaminational.org.au

Deegaanada Dawlada Hoose (Local Government Areas - LGAs)

Bayside, Glen Eira, Kingston, Port Phillip, Stonnington, Frankston, Mornington Peninsula, Melbourne, Moonee Valley, Merri-bek, Yarra, Brimbank, Hume, Maribyrnong, Hobsons Bay, Wyndham and Melton



Waxaad heli kartaa turjubaan lacag la'aan ah



Fariimaha Muhiimka ah

Lacag la'aan, wax ku ool ah isla markaasna lagu ixtiraamayo oo macaamiisha loogu talagalay

- Dhinac soco dadka qaba xaalado caafimaad oo dhimirka taas oo saameysa nolol maalmeedkooda.
- Waxaa lagaa caawin doonaa arjiyada NDIS-ta, sidii loo soo ururin lahaa cadeymaha taageeraya arjigaaga, dukumentiyada aqoonsiga, iyo in laguula hadlo xirfadlayaasha caafimaadka.
- Waxaa lagu siin doonaa taageero joogto ah iyada oo loo marayo Codsiyada helitaanka, dib u eegista iyo qiimaynta u-qalmida.

Taageero la balaariyay oo khuseysa u-qalmitaanka iyo dib u eegista

- Waxaa ka qaybgalayaasha laga caawin doonaa sidii ay u fahmi lahaayeen una buuxin lahaayeen Codsiyada Lagu Helayo NDIS.
- Waxaa ka qaybgalayaasha lagu hagi doonaa sidii mar kale qiimayn loo sameyn lahaa, dib u eegis iyo rafcaan in la qaato.
- In si ammaan ah, ixtiraamna ku jiro isla markaasna ayaga taageeraysa looga qeybgaliyo qoysaska iyo daryeelayaasha.

Adeegyada iskaashiga gobolka oo dhan ee tixraacayaasha iyo la-hawlgalayaasha

- Waxaa si wadajir ah idiin soo gaarsiiyay Neami, EACH iyo ACSO, waxaana maalgelisay Dowladda Victoria.
- Dariiqo cad oo laguugu gudbinayo dhakhtar guud (GPs), golaha deegaanka, Isku-duwayaasha Deegaanka iyo ururada bulshada.
- La shaqee adeegyada kale si ay kuugu fududaato inaad fahamto isla markaasna aad u sahmisu nidaamka NDIS-ta.

Loo dhan yahay lana heli karo

- Turjubaano lacag la'aan ah ayaa loo heli karaa dadka asal ahaan ka soo jeeda dhaqamada kale kuna hadla luuqado kale.
- Dhaqan ahaan adeegyadu waa kuwo amaan ah laguna ixtiraamo dadka asal ahaan ka soo jeeda Aboriginal-ka iyo dadka ka soo jeeda Torres Strait Islander.

Mudnaanta waxaa la siinayaa dadka baahidoodu sarreyso

- Waxaa loogu talagalay dadka la nool xaaladaha caafimaadka dhimirka ee aan ku xidhnayn adeegyada caafimaadka dhimirka.
- Taageerada waxaa diiradda lagu saari doonaa dadka la nool caqabadaha maalinlaha ah.
- Adeegyadu waxay la kulmaan ka qaybgalayaasha halkaas oo ay fahmaan oo daryeellaan.

U doodida sidii aad u heli lahayd maalgelin iyada oo loo marayo codka bulshada

- Sheekooyinka bulshada iyo tixraacyadu waxay muujinayaan baahida iyo saamaynta.
- In si xoogan laguugu doodo sidii loo sii wadi lahaa adeegyada iyadoo la muujinayo muhiimada ay leedahay in la helo, kaalmada NDIS ee shaqsiga diirrada lagu saarayo.